Ku dhaqan Xafiis D.

# Faafinta Rasmiga ah

# الجريدة الرسمية

# Official Bulletin

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 10aad** **Muqdisho, 31 Maarso 2023** **Lr. 1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# BILAHA

# JANUARY, FEBRUARY, MAARSO

# 2023

**Taariikh: 30/03/2023**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 120**

**XEERKA; XEER NIDAAMIYAHA MAAREYNTA DAREER-HOOSAADKA BATROOLKA**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuuka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summadeėdu tahay **WBM/XW/GB/0029/2023** ee ku taariikheysan **08/03/2023,**kuna saabsan codsi Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.

**Markuu arkay:** Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/03/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Nidaamiyaha Maareynta Dareer-Hoosaadka Batroolka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qabo in la meel-mariyo Xeerka Nidaamiyaha Maareynta Dareer-Hoosaadka Batroolka.

**Wuxuu Xeeriyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/02/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Nidaamiyaha Maareynta Dareer-Hoosaadka Batroolka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Waasaradda Batroolka iyo Macdanta loo igmaday fulinta iyo meel-marinta Xeerka Nidaamiyaha Maareynta Dareer-Hoosaadka Batroolka.

**Qodobka 3aad**

Xeerka Nidaamiyaha Maareynta Dareer-Hoosaadka Batroolka, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN-062-23
TAARIIKH : 12-04-2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

## Jamhuurita Federaalka Soomaaliya

**WASAARADDA BATROOLKA IYO KHAYRAADKA MACDANTA**

# *XEER-NIDAAMIYAHA MAAREYNTA DAREER-HOOSAADKA BATROOLKA*

***(PETROLEUM DOWNSTREAM REGULATION)***

**March, 2023**

**XEER GOLE WASIIRO**

**XEER-NIDAAMIYAHA MAAREYNT DAREER-HOOSAADKA BATROOLKA LR. XX SOO BAXAY XX JUUN 2021**

Si waafaqsan Sharciga Batroolka Soomaaliyeed Qodobkiis 45aad,Wasaaraddu waxay soo saartay Xeer-nidaamiyahaan:

**QODOBKA 1AAD :**
**MAGACA XEER NIDAAMIYAHA**

Xeer-nidaamayahan waxaa loogu yeerayaa Xeer-nidaamiyaha Dareer-hoosaadka shidaalka ee 2023.

**QODOBKA 2AAD:**
**BAAXADDA XEER NIDAAMIYAHA**

Xeer-nidaamiyahanwaxaa lagu maamulayaa dhamaan hawlaha dareer hoosaadka shidaalka iyo gaaska ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo u qaybsan sidaan:

1- Soo dajinta, sifaynta shidaal cayriin ah;
2- Keenista, kaydinta, qaybinta, iskuqaska (blending) iyo tafaariiqda shidaalka sifaysan;
3- Soo dajinta, habaynta, kaydinta, qaybinta iyo tafaariiqda gaaska dabiiciga ah iyo gaaska dareeraha ah;
4- Soo dajinta shidaalka Bio-fuels
5- Haraaga laga soo saaro shidaalka sida laamiga, walxaha laga sameeyo lugaha baabuurta, ama dareerayaasha kale ee laga helo shidaalka sida; olyada loo isticmaalo motoorada (engine oil), xayrta ama garaasada (grease), islis-yareeye (lubricants) iyo olyada lagu shubo taangiyada gawaarida oo loogu talagalay in lagu sifeeyo shidaalka, si loo yareeyo wasaqaynta hawada
6- Kaydadka shidaalka iyo gaaska;
7- Maqaaziinada haamaha(ambuuboyinka) gaaska dabiiciga ah; iyo
8- Iyo hawlakasto oo laxiriira arrimaha kor lagu soo sheegay oo ay Wasaaraddu ay ogolaato.

**QODOBKA 3AAD:**
**UJEEDDADA XEER NIDAAMIYAHA**

Ujeeddada Xeer nidaamiyaha waa:

1. In dib loo qaabeeyo doorka Xukuumadda ee Dareer-hoosaadka Shidaalka iyo gaaska ,maareyntiisa iyo howlaha kale ee la xiriira hawlahaas,
2. In la abuuro Halbeeg lagu ilaaliyo tayada shidaalka kaasoo lagu salaynayo halbeega caalamig ah iyo habdhaqanka wanaagsan ee maamulka iyo maaraynta dareer hoosaadka shidaalka.
3. In hoos loo dhigo khatarta caafimaad iyo deegaan ee la xiriira hawlaha ka dhalan karo kaydinta, daabulaadiisa iyo tafaariqda shidaalka iyo gaaska.
4. In lagu maareeyo tayada shidaalka dalka la keeno iyo in laga hortago keenista shidaal tayadiisu ka hooseeyso tayada shidaalka ee uu tilmaamayo xeer-nidaamiyahan, isla markaana aan buuxin shuruudaha heerka (standard) shidaalka gobolka bariga Africa iyo caalamkaba.

**QODOBKA 4AAD:**

**ERAYBIXIN**

Hadaan si kale loogu xusin dhamaan micnaha erayada xeerkan waxay yeelanayaan sida lagu qeexay sharciga Batroolka,iyadoo ereyada soo socda ay yeelanayaan micnayaasha ku hor qoran:

1. **Dareer-hoosaad**: waa wadarta shaqooyinka la xiriira shidaalka ama Haydroo-kaarboonka, laga soo billaabo soo dejinta, kaydinta, qaybinta, sifaynta, isku-milanka (blending) iyo ka ganacsiga. warshadaynta betro-kiimikada ee loo adeegsado haraaga shidaalka si loo sameeyo daawada milmeeyaasha cayayaan-dileeyaasha, iyo caagga.
2. **Shidaalka Diyaaradaha**: Waa nooc ka mid ah Shidaalka oo leh tayo sare awoodna siinaysa matoorada dayaaradaha.
3. **Barta Holaca:**waa barta marka la kululeeyo shidaal uu bixiyo bukhaar asagoo ku dhex holcaya hawada.
4. **Kaalin Shidaal:** waa dhismo si qaabaysan loogu talo galay oo siiya baabuurta shidaaliyo adeegyo kale ayagoo adeegsanayo bambo cadaadis ku shaqaysa oo la xariirta dhismo dhuleed lagu kaydiyo shidaalka. Waxay kaloo leedahay akhriye ku tusinaya mugga shidaalka uu baabuurka qaatay iyo qiimaha mugga shidaalka.
5. **Xukuumadda:**waxaa loola jeedaa Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyadoo adeegsanaysa saraakiisha hay'adaha, wakaaladaha ama Wasaaradaha, waana laanta fulinta ee Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
6. **Sharciga:** waxaa loola jeedaa Sharciga Lr. 19 ee soo baxay 2020 laguna magacaabo Sharciga Batroolka Soomaaliya.
7. **Wasiir**:- waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaarad ka tirsan Xukuumada waqti ka waqti mas'uul ka ah inuu maamulo sharcigan oo hada ku suntan Wasiirka Batroolka iyo Macdanta.
8. **Wasaaradda**- waxaa loola jeedaa wasaaradda waqti ka waqti mas'uul ka ah inay maamusho sharcigan, sida ay qaabaysay xukuumad taas oo ku suntan Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.
9. **Nafto:** waa dareere kasta oo loo isticmaalo matoorada naftada ah kaasoo ah maxsuulka sifaynta saliida cayriinNaftada. Waa iskudhis kiimikaad oo leh moolekiyuul silsilladda kaarboonku tahay **min 8 illaa 21;** heerkulka uu ku karkaro wa 200-350 ˚C, marka sifaynta salidda cayriin socoto.
10. **Maxsuulka shidaalka (Petroleum by-product):** waa haydrokaarboon lagu daray waxyaabo kale oo ka yimaada sifaynta saliida cayriin oo aan ahayn bansiin, nafto iyo shidaalka diyaaradaha.
11. **Halbeeg iyo Hogatus:-**Halbeegyada ku cad Xeer-nidaamiyahan waa la bedeli kara markii loo baahdo haddii la arko kala duwanaansho u dhaxayso xeerarka iyo halbeegyada ama hogatuska halkan lagu sheegay.

**QODOBKA 5AAD:**

**MAAREYNTA IYO XAQIIJINTA TAYADA SHIDAALKA**

Wasaaradda Batrrolka iyo Macdanta waxay masuul ka tahay howlaha maareeynta iyo korjoogtaynta dhamaan dareer-hoosaadka shidaalka iyo gaaska dabiiciga ah ama gaaska LPG ee loo isticmaalo kariska cuntada.Wasaaradda ayay masuuliyad ka saarantahay la socodka iyo ka talinta hawlaha dareer hoosaadka iyo xallinta murannada la xiriira howlaha dareera hoosaadka.

**QODOBKA 6AAD:**

**HOWLAHA IYO WAAJIBAADKA SHAQO EE WASAARADDA**

Wasaaradda iyadoo raacayso qorsha howleedkeeda isla markaana qabanayo shaqooyinka uu tilmaamayo xeer-nidaamiyahan ayay dhaqan gelinaysaa qabashada howlahan hoos ku qoran:

I. Wasaaradda ayaa ka masuul ah dhaqangelinta xeer-nidaamiyahan iyadoo la kaashanayso hay'adaha aay kala dhexeeyaan wada shaqaynta.

II. Wasaaradda iyo ciddii aay u idmato ayaa ka masuul ah qabashada howlaha ilaalinta iyo baarista dareer-hoosaadka shidaalka iyo gaaska dabiiciga.

III. Wasaaraddu waa in aay diiwaan geliso ganacsatada soo dejisa shidaalka iyo gaaska dabiiciga, ganacsatada iibiso iyo ganacsatada leh kaalimada shidaalka lagu iibiyo.

IV. Waa in wasaaradda ama ciddii uga wakiil ah xaqiijiyaan in ganacsatadu buuxiyeen shuruudaha ka ganacsiga shidaalka iyo gaaska dabiiciga ka hor inta aysan wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha siin ruqsada ka ganacsiga shidaalka ama gaaska dabiiciga.

V. Waa in Wasaaraddu u furtaa ganacsatada danaynaysa ka ganacsiga shidaalka ama gaaska dabiiciga aqoon kororsi ama seminaaro lagu fahmsiinayo heerka tayada shidaalka ama gaaska dabiiciga ee dalka la keeni karo, isla markaan loo sheego khatarta ka dhalan karta kaydinta, shubista iyo daabulista shidaalka haddii aan si sax ah loo maareeyn.

**QODOBKA 7AAD:**

**KORMEERAYAASHA GOOBAHA SHIDAALKA**

1. Shaqaalaha wasaaradda ayaa kormeerayo gobaha shidaalka iyo gaaska lagu kaydiyo iyo goobaha lagu iibiyo iyagoo hubinayo tayada shidaalka iyo gaaska.
2. Xeer nidaamiyahu waxuu awood u siinayaa shaqaalaha wasaaradda ama ciddi kale ee loo idmado ee kormeerayo goobaha lagu iibiyo shidaalka iyo gaaska in;
   - i) Aay joojiyaan iibka shidaalka iyo gaaska aan la hayn tayada uu xeer-nidaamiyahu tilmaamay lana ogol yahay in la iibiyo.
   - ii) Aay xiraan gebi ahaan goobaha uusan xeer-nidaamiyahu u fasaxayn in shidaal iyo gaas lagu iibiye, oo aay ka dhalan karto khatar naf iyo hanti.

## QODOBKA 8AAD:
## NOOCA, TAYADA, HEERKA IYO BAARISTA

### 1. Noocyada Shidaalka ee Dalka la soo gelin karo

Noocyada shidaalka dalka la gelin karo waxaa ku jira: Nafto, Bansiin, Gaaska Dabiiciga ah (LNG ama LPG), Shidaalka Diyaaradaha, Keerosin, Shidaalka culus iyo kan Bio Fuel.

### 2. Shidaalka khatarta ah:

Waa shidaal bartiisa hollaca ay ka hoosayso 22.8 ˚C. Shidaalkaan waa in laga taxadiraa weelka uu ku jiro iyo heerkulka deegaanka ku wareegsan**,** waana in lagu calaameeya Shidaal khatar ah laguna qoraa Somali, Carabi iyo Ingiriis.

### 3. Tayada Shidaalka

Shidaalka la keenayo waa inuu waafaqsan yahay heerka tayada ee Bariga Afrika ee ku lifaaqan Xeer-nidaamiyahaan

### 4. Halbeegga Shidaalka Diyaraadaha

I. Shidaalka diyaaradaha waa inuu ahaadaa nooca Jet A-1 oo ah Keerosin oo ku barafooba barta -47 degree celcius (*c),

II. Sifaha halbeega waxaa kaloo sii qeexa ASTM D1655-

5. **Heerka (Standard) Gaaska Dabiiciga ah**

a) Gaaska dabiiciga ah ee la keeni karo waa inuu sammaysankiisa kiimikaad ahaadaa sidaan: Methae (94.9%), Ethane (2.5%), Propane (0.2%), Inta soo hartay oo ka samaysan Iso-Putane, Putane caadi ah, Iso-Pentan, Pentane caadi ah iyo Hexane.

b) Waa inuu waafaqsan yahay astaamaha hoos ku qoran:

   i. Carbon-dioxide waa inuu ka yar yahay 2%,

   ii. Nitrogen waa inay ka yar tahay 3% mug ahaan,

   iii. Oxygen waa inuu ka yar yahay 1%.

   iv. Waa inuusan ku jirin adke iyo wax la mid ah:.

c) Halbeegga qeexaya tayada gaaska dabiiciga ah waa ISO 75.060.

### 6. Shaybaarka Shidaalka

Wasaaraddu waxay awood u leedahay inay muunad ka qaaddo shidaal dalka soo gelaya kaddibna ay baarto tayadiisa iyadoo waafajinayso halbeega dalku leeyahay lana raacayo habraaca soo socda:

## I. Cidda fulineysa howlaha sheybaarka

Wasaaraddu waxey fulin kartaa ama u idman kartaa howlaha  la xiriira sheybaarka Shidaalka shirkad ku takhasustay farsamada baarista  tayada batroolka kuna xeeldheer arrimaha baarista iyo hubinta heerka tayo ee  shidaalka si waafaqsan hannaanka jaango'an ee caalamiga ah  loo yaqaan ISO17025.

a) Shirkadda muunada  loo hubinayo waxey bixinaysaa Khidmadda lagu qabanayo hawsha barista. Qiimaha khidmada baaristu wuxuu ku cadyahay jadwalka qodobka 2aad.

b) Caddaynta Warqadda Lacag Qabashada: Wasaaradda ama cidda ay u idmatay howlaha barista Shidaalka waa iney bixisaa warqadda caddeyneysa lacag qabashada kuna keydisaa xafiiska nuqul Isla markaasna diiwaan gelisaa natiijada sheybaarka. Sarkaalka xafiisku waa inuu siiyaa shirkadda koobi natiijadii sheybaarka ee hubinta tayada.

## II. Habka fulinta Sheybaarka:

a) Qofka soo dhoofinaya shidaalka waa in uu u soo gudbiyaa Wasaaradda, Hay'adda Taya Dhowrka iyo Shirkada Loo wakiishay, todobbo maalmood ka hor inta uusan markabku ku soo xiran Dekedaha Soomaaliya, shahaado caddeyneysa tayada shidaalka la soo dhoofinayo taas oo waafaqsan nidaamka caalamiga ah ee ISO17025.

b) Shahaadada tayada shidaalka waa in ay si faahfaahsan u caddeysaa asalka badeecadda, aqoonsiga gaarka u ah shixnada iyo meesha laga keenay.

c) Waxaa reebban in shidaal suuq madow ah la soo geliyo Soomaaliya. Waxaa sidoo kale reebban in Soomaaliya la soo geliyo shidaal ka sameysan isku-milanka shidaal nooc iyo tayo ahaan kala duwan.

d) Nuqul shahaado oo ay soo saartay hey'ad madaxbannaan caddeyneysana tirada shidaalka saaran markabka waa in loo soo gudbiyaa Wasaaradda iyo Hay'adda Tayo dhowrka.

e) Sarkaal ka socda Wasaarada Batroolka,Sarkaal ka socda Hey'adda Tayadhowrka Soomaaliya iyo Sarkaal ka socda Shirkadda u xilsaaran sheybaarka tayada iyo tirada shidaalka ayaa muunad ka qaadaya shidaalka saaran markabka ka hor inta aan la siin oggolaansho lagu dejinayo.

f) Baarista muunada waxaa goobjoog ka noqonaya qofka ka socda Wasaarda ,qof ka Socda Hey'adaha Taya-dhowrka Soomaaliya iyo qofka soo dhoofsaday shidaalka ama cid isaga uu soo wakiishay. Natiijada barista waxaa lala wadaagayaa Wasaaradda, qofka soo dhoofsaday shidaalka iyo hay'adaha u xilsaaran arrimaha furdooyinka.

g) Shirkadda waxey soo saareysaa shahaado caddeyneysaa tirada shidaalka ee markabka iyadoo ku saleyneysa haamaha loogu talogalay keydinta shidaalka, waxeyna u gudbineysaa hey'adaha u xilsaaran furdooyinka si ay u soo saaran canshuurta ku waajibtay.  Markabka sida shidaalka waa in mar waliba uu heystaa shahaado caddeyneysa cabirka haamanka keydinta shidaalka.

h) Waxaa reebban in markabka sida shidaal loo oggolaado in dejiyo/furto isaga oo aanan helin shahaado caddeyneysa natiijada baaritaan ee tayada iyo tirade shidaalka uu sido.

i) Wasaaraddu waxey soo saareysaa hage-fulineed oo si faahfaahsan u caddeynaya fulinta arrimaha ku xusan qodobkaan.

j) Wasaarada ama shirkadda loo wakiishay baaritaanka tayada shidaalka waxa aay awood u leeyahiin in aay baaraan kaalimada iyo meel walba oo lagu iibinayo shidaal dalka gudahiisa iyo gawaarida xamuulka shidaalka si loo hubiyo tayada shidaalka

III. **Cabasho go'aanka Sheybaarka:**

Haddii ay Shirkaddu ku qanci waydo, go'aanka sheybaarka waxay ka caban kartaa go'aankaas iyadoo codsanayso dib u eegis iyo in lagu sameeyo shaybaar kale ayadoo una gudbinaysa Cabashadeeda Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta, XJFS

IV. **Xaqiijinta Natiijada Sheybaarka:**

Muunad cusub ayaa laga qaadayaa xamuulka mar labaad si loo hubiyo xamuulkaasi inuu waafaqsan yahay heerka tayada. Wasaaradda haddii ay u caddaato in shidaalka ama gaaska la baaray uusan waafaqsanayn xeer-nidaamiyahaan, waxey go'aamineysa in dib loo celiyo shidaalkaas ama gaaskaas.

**V. Iskaashiga Wasaaradda iyo hey'addaha kale ee Dowladda:**

Wasaaraddu waxey iskaashi la yeelan kartaa hey'addaha Dowladda marka la fulinayo howlaha sheybaarka Shidaalka iyo Gaaska ee ku xusan qodobkaan. Sida hay'adaha amniga oo aan looga maarmayn in aay mar walba la socdaan howlwadeenada sameeynaayo Baaritaanka tayada shidaalka

**QODOBKA 9AAD:**
**HABRAACA SOO-DEJINTA, KAYDINTA, QEYBINTA & TAFAARIIQDA**

1. **Diiwaan gelinta shirakadaha Shidaalka:**

Shirkadaha ka ganacsada shidaalka iyo gaaska waxaa looga baahan yahay shuruudaha hoose iney soo buuxiyaan:

I. Waa inay haysataa rukhsad ganacsi oo ka soo baxday Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, kuna cad yihiin cinwaanka ganacsiga, teleefoon nambar iyo mulkiilaha shirkada ganacsiga shidaalka.

II. Waa inay u qaabaysan tahay shirkad ahaan, si waafaqsan sharciga shirkadaha 2019 ee JFS,

III. Waan in shirkada leedahay xarun kayd shidaaal ama u kiraysan tahay oo la timaadaa heshiiskii ay ku kuraysatay dhigtaana shidaal dhan 400 tan.

IV. Waa inay iska diiwan-geliso Wasaaradda Batroolka& Macdanta;

V. Waa iney leedahay ceymis la xiriira ganacsigeeda, Dowladuna aqoonsan tahay.

2. **Noocyada shirkadaha dareer hoosaadka:** Shirkadda waa inay iskudiiwaan gelisaa hadba shaqada ay ka qabato dareer-hoosaadka batroolka., iyadoo loo qaybinayo shaqada shirkadaha daneynaya ka ganacsiga shidaalka.

    I. Soo dejinta,Keydinta iyo Daabulida shidaalka Gaska Nooca JET-A10 guud.

II. Soo dejinta,Keydinta iyo Daabulida Gaska Cuntada.
III. Ka ganacsiga kaalimaha shidaalka; iyo
IV. Sifaynta iyo isku-milanka.

**3. Qaadashada & Muddada Rukhsadda**

I. Wasaaradu waxay kaga soo jawaabaysa dalabka rukhsadaha mudo 4 casho ah.
II. Dhammaan shirkadahaas waa inay Wasaaradda ka qaataan rukhsad shaqo ay ku hawlgalayaan .
III. Muddada rukhsad kasta waa hal sano oo la cusbonaysiin karo.
IV. Khidmada cusbooneysiinta Ruqsada waxay ku caddahay jadwalka 2aad.

**4. Wareejinta Rukhsada:**

1. Shirkadda hadii la gato ama magaceeda isbeddelo, ruqsada waxaa loo wareejin karaa shirkadda cusub, iyadoo ogaysiis qoraal ah la soo siinayo Wasaradda.
2. Ruqsad waxaa la wareejin karaa oo keliya marka ay Wasaarada ka hesho ogolaasho.
3. Khidmada wareejinta ruqsada waa inay noqota mid waafaqsan sida ku cad jadwalka 2aad.

**5. Ganaax iyo kala noqoshada Rukhsada:**

Shirkaddii u hoggaansami weydo ilaalinta heerka (standard) shidaalka si joogto ah waxaa laga qaadayaa tallaabo anshax ah iyadoo:

I. Marka ugu horreysa digniin qoraal ah la siinayo,
II. Marka labaad haddii ay shirkaddu aysan sixin khaladaadkeeda muddo 10 maalmood ah marka laga bilaabo xilligii ay heshay qoraalka digniinta ah, waa la ganaaxayaa iyadoo lagu caddeyn doono qoraalka nooca ganaax lacageed ee lifaaqa 3aad.
III. Ugu dambayna waxaa lagala noqonayaa ruqsada.

## QODOBKA 10AAD:
## HAWLAHA SHIDAALKA

**1. Soo Dejinta Shidaalka**

I. Shirkadaha ku howlan soo iibinta shidaalka waa inay ilaaliyaan sharciyada caalamiga ah ee la xiriira ka ganacsiga shidaalka.
II. Shirkadaha soo dejinta shidaalka waa inay ka soo gadaan shidaalka suuqa muuqda, oo ay ka fogaadaan saliida lagu gado suuqa madow ama aay waddanka keenaan shidaal tayadiisa hooseeyso
III. Shirkaduhu ma soo keeni karaan dalka shidaal aan buuxinayn shuruudaha & Heerka tayo ee shidaalka dalka.

IV. Ka hor intaan la baarin tayada shidaalka, waa in la hubiyaa shixnadda shidaalka tayada uu leeyahay oo ku qoran dokumentiga tayada ee milkiilaha shidaalka uu ka soo qaatay meesha uu ka soo gaday.

V. Sida ku cad dokumeentiga tayada ee lagu soo gaday shidaalka, haddii aysan waafaqsaneyn tayada shidaal ee dalka uma baahna sheybaar tayo waxaa lagu celinyaa shixnaddaas markabka sida.

VI. Hadday caddaato inaan dokummenti tayo la socon shixnadda shidaalka ee dalka soo gelaya waxaa in:

   a) La ganaaxayaa markabka sida shixnadda.
   b) La ganaaxayaa shirkadda soo gelisay shixnaddaas dalka

**2. Daabulidda Gaaska Dabiiciga ah**

I. Gaaska dabiiciga ah waxuu u baahan yahay maareyn gaar ah , waana in lagu soo daabulaa/Safriyaa haamo ku habboon oo adag oo iska xajin kara cadaadiska iyo heerkulka.

II. Cadaadiska iyo heerkulka waa in la hubiyaa markasta oo la maareynayo shixnad Gaas Dabiici ah.

**3. Keydinta Shidaalka diyaaradaha**

Kaydka shidaalka diyaarada waa inay ku yaallaa meel aan ka fogeynin gegidda diyaaradaha. Shixnadeynta shidaalka waxaaa loo isticmaalayaa haamo iyo gaadiid ku haboon oo leh shuruudaha looga baahan yahay heer caalami sida in ay lahaato dabdamis.

**4. Shirkadaha Daabulidda Shidaalka Waddanka Gudihiisa**

Shirkad diiwaan-gashan haysatana rukhsad ayaa loo oggolyahay inay daabusho shidaalka oo u qeybiso kaalimada shidaalka.

**5. Gaadiidka Haamaha Shidaalka**

Gaadiidka xambaarsan haamaha shidaalka ee dhulka mara waa inay lahaadaan heerla mid ah heerka caalamiga ah, isla markaana ay awood u leeyihiin ineymaareeyaan shidaalka ku shubaan godkii loogu talagalay.

**6. Wadayaasha gaadiidka xamuulka shidaalka.**

Wadayaasha gaadiidka haamaha xamuulka shidaalka waa inay leeyihiin ruqsad wadida ee heerka sare una tababaran yihiin ka hortagga khataraha ku iman kara dhinacyada caafimaadka iyo deegaanka.

**7. Kaalimaha shidaalka**

I. Kaalimaha shidaalka waa meel u habaysan in lagu gado shidaal tafaariiq ah.

II. Kaalimahu waxaa loo dhisayaa si looga nabadgeliyo gubasho iyo dhibaataynta bay’ada.

III. Milkilaha Kaalinta Shidaalka waa inuu qaataa Ruqsad loogu oggolaanayo inuu hawlaha shidaalka goobtaasi uu ka fuliyo.Meel aan ku haboonayn lagama dhisi karo kaalin shidaal sida suuqyada,xaafadaha iyo meel u dhow iskuullada iyo isbitaallada iyo meelaha qolalka yaryar.

**8. Shidaalka Jidadka lagu gado.**

Si loo badbaadiyo caafimaadka bulshada iyo hantidooda, loogana hortago khatar ku timaado deegaanka, shidaalka tafaariiqda ah waxaa lagu iibin karaa oo keliya Kaalin Shidaal. Sidoo kale ganacsatada loo oggolaaday inay shidaalka ka iibiyaan maraakiibta dekedaha ku soo xirto waa in ay fasax uqaataan hawlahooda. Meel aan kaalin shidaal ahayn laguma gadi karo shidaal sida fuustooyin ama caagag, ciddii lagu helana waxay mutaysanayaa ciqaab si waafaqsan Shuruucda Dalka.

**9. Shuruuda kaalimada shidaalka**

I. Bedka ugu yar ee kaalin shidaal yeelan karto waa 20m x 30m
II. Kaalin shidaal waa inay leedahay laba marin oo furan, oo midna laga soo galo, midna laga baxo.
III. Kaalimaha waa inay lahaadaan haamo lagu kaydiyo shidaalka oo dhulka hoostiisa ku jira si nidaamsanna loo farsameeyey ugu yaraan 3 xabo.
IV. Kaalin shidaal waa inay leedahay adeegyada looga hortago gubashada iyo fatahaadda shidaalka, lana waafajiyo heerarka caalamiga ah.
V. Kaalinta shidaalku waa in ay leedahay qalab loo adeegsanayo bamboo cadaadis ku shaqeysa.
VI. Kaalinka Shidaalku waa inay haystaa qalab dab hadduu kaco lagu damiyo.
VII. In la soo cadeeyo inta ay isku jiraan 2 da kaalimood si waafaqsan sharciga.

**10. Adeegyada kale ee kaalimaha Shidaalka:**

Kaalimada shidaalka waa inay bixin karaan adeegyo dheeraad ah sida iibinta saliidaha matoorka, lugaha baabuurta, xeyrta birta, adeegga lugaha, dhaqidda gawaarida, goob lagu qaxweeyo, musqulo ay adeegsan karaan lab iyo dhedig, iyo dukaan (mini-mart ah)

**11. U hoggaansamidda shuruudaha kaalimaha shidaalka:**Kaalimaha shidaal ee si buuxa u shaqeeya ka hor inta uusan Xeer-nidaamiyahaan dhaqangelin, waxaa lagu sameynayaa qiimeyn ku aaddan buuxintooda shuruudaha kaalimaha shidaalka looga baahan yahay. Kaalintii buuxisa shuruudahaasi waxaa la siinayaa rukhsadda ay ku howlgasho.

## QODOBKA 11AAD:
## ILAALINTA DEEGAANKA IYO NOOLAHA

**1. ILAALINTA DEEGAANKA**

I. Dhamaan howlaha la xariira batroolk laga soo billaabo dareer Koraadka illaa Dareer Hoosaadka, wa inay waafaqsan yihiin Sharciga Ilaalinta Biiada Soomaaliya, Xeerarka iyo halbeegyada kale ee caalamka; sida kan Qaramada Midoobay Fadhigiisii Bii'ada iyo Horumarinta (United Nations Conference on Environment and Development - UNCED) ee Rio 1992.

II. Gaadiidka qaada shaxnadda shidaalka waa inuu ilaaliyo bay'ada (badda dalka & tan caalamiga) iyo berriba inta uu sido shidaalka iyo markuu ku soo xirto dakadaha Soomaaliya. Waa in mar kasta la ilaaliyaa fayaqabka badda iyo dhulka oo aanu ku daadanin shidaal.

III. Dhibaata kasta oo ka dhalata soo qaadista iyo dejinta xamuulka shidaalka waxaa mas'uul ka ah gaadiidka sida xamuulka & shirkadda iska leh shidaalka.

**2. BADBAADADA NOOLAHA.**

Dhammaan shaqooyinka la xiriira batroolka laga bilaabo dareer koraadka illaa darer hoosaadka waa inay badbaadiyaan noolaha ku nool deegaanka ayagoo raaca hab waafaqsan Xeerka Badbaadada noolaha, xeerarka iyo halbeegyada kale ee caalamka sida;

I. Ka hortaga Shilalka ee Qaramada Midoobay Barnaamijka

II. Bay'adda (UNEP) iyo ilaalinta caafimaadka shaqaalaha & noolaha kaleba.

## QODOBKA 12AAD:
## KAYDKA ISTIRAATIJIGA EE SHIDAALKA

1. Xukuumadda Soomaaliya waxaa xil ka saran yahay in mar waliba dalka laga heli karo shidaal ku filan, gaar ahaan xilliyada uu dalku waajaho xaalado adag sida culays ka yimaado dhaqdhaqaaqa shidaalka caalamiga ah iyo marka dalka la soo gudboonaado xaalado ay ka mid yihiin dagaallo iyo musiibooyin dabiici ah sida abaaro.
2. Si taasi loo xaqiijiyo Wasaaraddu waxay ku wargelinaysaa ganacsatada soo gelisa shidaalka dalka inay iska diiwaangeliyaan Wasaaradda, mid walibana ay oggolaato in mabdi'yan uu dalku yeesho kayd shidaal oo istiraatiiji ah kaas oo looga gudbo duruufaha aan kor ku xusan.
3. Kaydka qorsheysan wuxuu noqon karaa ilaa 20.000 MT sannadkiiba taasoo laga rabo in mar waliba laga heli karo kaydadka shidaalka.
4. Shirkadii fulin waydo shuruudahaasi waxaa ka mamnuuc ah inay dalka soo geliso wax shidaal ah.
5. Shirkadaha shidaalka ee ruqsadaha haysta waa inaysan ku xadgudbin qoondaha kaydka shidaalka iyadoo aan oggolaansho ka haysan Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.
6. Iyadoo la tixgelinaayo siyaasadda amniga tamarta (Energy security Policy) ee dowladda, iyo si waafaqsan sharciga Batroolka Soomaaliya qodobkiisa 18aad ee tilmaamayo howlaha iyo waajibaadka shaqo ee wasaaradda; wasaaraddu waxaay dib ula soo ceshanaysaa Haamihii shidaalka ee wasaaradu hore u isticmaali jirtay ee dekedda, waxayna maalgashi ku samaynaysaa dhismaha haamo shidaal cusub si loo hubiyo kayd shidaal oo dabooli karo baahida Dalka

## QODOBKA 13AAD:
## HANTIDA MAGUURTADA AH EE WAKAALADA BATROOLKA SOOMAALIYA

Dhammaan hantidii Qaranka ee Wakaalada Batroolka Soomaaliya lahayd wixii ka horeeyay 31 December 1990[kii] waxaa milkiyadeeda yeelanaya masuulna ka ah badqabkeeda, kiraynteeda iyo ilaalinteeda Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## QODOBKA 14AAD:

**FULINTA XEER-NIDAAMIYAHA**

Xeer-nidaamiyahan waxaa u xilsaaran fulintiisa Wasaaradda Batroolka & Macdanta Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

**QODOBKA 15AAD:**
**WAX KA-BEDELKA XEER-NIDAAMIYAHA**

Xeer-nidaamiyahaan waxaa wax looga beddeli karaa iyadoo la raacaayo nidaamka wax ka bedelidda xeerarka iyo xeer-nidaamiyaasha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**QODOBKA 16AAD:**
**XOOJINTA SHARUUC IYO XEERAR HORE**

Xeer nidaamiyahaan waxaa lagu dhaqangalinayaa si wafaaqsan Sharciga Batroolka ee 2020 ee JFS, iyo Sharci 42 ee 1da Disember 1973 ee Wakaalada Batroolka Soomaaliyeed si loo maareeyo hawlaha dareer-hoosaadka shidaalka iyo gaaska.

**QODOBKA 17AAD:**
**DHAQANGALKA XEERNIDAAMIYAHAAN**

Xeer nidaamiyahaan wuxuu dhaqan-galayaa taariikhdaay ansixiyaan Golaha Wasiiradda. Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

**JADWALKA KOWAAD: RUQSADAHA SHIDAALKA EE SANNADKIIBA**

| SN | Hawlaha Ganacsiga batroolka iyo Gaaska Diyaaradaha Jet-A-1 | Khidmada batroolka iyo Gaaska Diyaaradaha Jet-A-1 (USD ) | Khidmada cusbooneynsiinta batroolka iyo Gaaska Diyaaradaha Jet-A-1 (USD) | Khidmada Gaska Cuntada | Cusbooneysiinta Gaska Cuntada |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Keenista. Kaydinta iyo Daabulida. | 1,000.00 | 500.00 | 500 | 200.00 |
| 2. | Ganacsiga Kaalimaha Shidaalka | 500.00 | 500.00 | 200 | 100 |

**JADWALKA LABAAD:KHIDMADA BIXINTA SHAYBAARKA**

| Sn | Nooca Shidaalka | Qiimaha (USD per Metric Ton and metric Cube) |
|---|---|---|

| | | |
|---|---|---|
| 1 | GasOil (Diesel) | Inspection Analysis and fuel Marking Charges 20 USD /per Metric Cube |
| 2 | Gasoline (Patrol) | Inspection Analysis and fuel Marking Charges 20 USD /per Metric Cube |
| 3 | Jet A1 | Inspection Charges 0.95 / USD /per Metric ton *MT and Analysis Charges 0.060/USD /MT |
| 4 | Lubricants greases | Inspection Charges 0.95 / USD /per Metric ton *MT and Analysis Charges 0.060/USD /MT |

**JADWALKA 3AAD: KHIDMADA GANAAXA RUQSAD KALA NOQOSHADA**

| SN | NOOCA SHIRKADA | QIIMAHA |
|---|---|---|
| 1 | Soo dejinta,Kaydinta iyo Daabulida shidaalka caamka ah sida Naaftada iyo Baasiinka iyo Gaaska diyaaradaha JET A-1 | $500.00 |
| 2 | Soo dejinta,Kaydinta iyo Daabulida shidaalka caamka ah Gaaska Cuntada | $100 |
| 3 | Kaalimaha Gaska Cuntada | $200 |
| 4 | Kaalimaha Shidaalka | $500 |

**JADWALKA 4AAD: HALBEEGGA BARIGA AFRIKA EE SHIDAALKA IYO SOOMAALIYA**

**[Somalia, Kenya, Uganda, Tanzania, Rwanda iyo Burundi]**

| Gaasoliin ama Batrol - Premium motor spirit (unleaded) | |
|---|---|
| Halbeegga (Parameter) | Xuduudda (Limits) |
| RON [Research octane number] | Ugu yaraan 93 |
| MON [Motor octane number] | Ugu yaraan 83 |
| Wadarta Salfarka) - Sulphur content | Ugu badnaan 15 ppm |
| Cufnaanta @ barta heerkulka 15 ˚C | 720 - 780 g/ml |
| Lead inta ku jirta | Ugu badnaan 0.013 g/L |

| | |
|---|---|
| Benzene inta ku jirta | Ugu badnaan 3% v/v |
| Diisel (Diesel) | |
| cadada cetane ka (Cetane number) | Ugu yaraan 51 |
| Tusmada Cetane ka (Cetane Index) | Ugu yaraan 48 |
| Wadarta Salfar (Total Sulphur Content) | Ugu badnaan 50 ppm |
| Barta heerkulka holaca (Flashpoint) | Ugu yaraan 66 ˚C |
| Cufnaanta @ 15 ˚C | 820 -870 kg/$m^3$ |